San Diego Unified School District

Heshiiska Waxbarashadda ee Dugsiga Sare: 2008-09

Dugsi _____

Magaca Ardeyga _____ Nambarka Aqoonsiga._____ Heerka Fasalka_____

Kooxda Wada shaqeynta _____

Xaaladaha Halista ee ku Salleysan Warbixinadan Hoose (Waxaad ku lifaaqdaa barnaamijka DataDirector ee Taariikhda Waxbarashadda Ardeyga iyo Warbixinada Horumarka):

_____CST _____CAHSEE _____PCAHSEE _____Gates-MacGinitie _____CELDT _____Fasalada _____eOPL

____Dhibcaha _____Cabbirka Qiimeynta (Caddee): _____

_____Diiwaanka Akhlaaqda _____Diiwaanka Imaanshaha _____Naqtiinka Waxbarashadda (AB 1802- ee Fasalada 7aad– 12aad Halista ku jira)

Bilowga La-talinta Waxbarashadda:			
Bilowga La-talinta Waxbarashadda:			
Dhex-gelista inta aysan wax dhicin ee Heerka 1aad	**Taariikhaha**	**Natiijooyin**	**Talaabooyinka Xiga** ☐ Joojinta Dhexgelista--Yoolalkii waa la Gaadhay ☐ Dhex-gelista sii wad--Horumar ayaa la sameynayaa. Kormeerka sii wad. ☐ Cusbooneysiinta Dhex-gelista
	Taariikhaha	**Natiijooyin**	**Talaabooyinka Xiga** ☐ Joojinta Dhexgelista--Yoolalkii waa la Gaadhay ☐ Dhex-gelista sii wad--Horumar ayaa la sameynayaa. Kormeerka sii wad. ☐ Cusbooneysiinta Dhex-gelista
Dhex-gelista inta aysan wax dhicin ee Heerka 2aad	**Taariikhaha**	**Natiijooyin**	**Talaabooyinka Xiga** ☐ Joojinta Dhexgelista--Yoolalkii waa la Gaadhay ☐ Dhex-gelista sii wad--Horumar ayaa la sameynayaa. Kormeerka sii wad. ☐ Cusbooneysiinta Dhex-gelista
	Taariikhaha	**Natiijooyin**	**Talaabooyinka Xiga** ☐ Joojinta Dhexgelista--Yoolalkii waa la Gaadhay ☐ Dhex-gelista sii wad--Horumar ayaa la sameynayaa. Kormeerka sii wad. ☐ Cusbooneysiinta Dhex-gelista
Dhex-gelista inta aysan wax dhicin ee Heerka 3aad	**Taariikhaha**	**Natiijooyin**	**Talaabooyinka Xiga** ☐ Joojinta Dhexgelista--Yoolalkii waa la Gaadhay ☐ Dhex-gelista sii wad--Horumar ayaa la sameynayaa. Kormeerka sii wad. ☐ Cusbooneysiinta Dhex-gelista
	Taariikhaha	**Natiijooyin**	**Talaabooyinka Xiga** ☐ Joojinta Dhexgelista--Yoolalkii waa la Gaadhay ☐ Dhex-gelista sii wad--Horumar ayaa la sameynayaa. Kormeerka sii wad. ☐ Cusbooneysiinta Dhex-gelista

<u>Waxaa loo baahan yahay in la qabto Shir lagaga wada Hadleyo Qorshaha Dhex-gelista inta aysan wax dhicin (Shirka Ardeyda Halista ku jirta ugu dambeystii Toddobaadka 12aad):</u>

Saxiixa Waalidka: _____Taariikhda: _____

Saxiixa Ardeyga: _____Taariikhda: _____

Saxiixa Maamulaha: _____Taariikhda: _____

Warbixin loogu talagalay Waalidka ama Qofka ardeyga masuulka ka ah:

Dugsi kasta oo ku yaal degmada wuxuu la shaqeynayaa carruurta, waalidiinta, iyo dadka ilmaha masuulka ka ah si ay ardeydu waxbarashadda ugu guuleystaan, isla mar ahaantaasna, ay u keenaan heerarka buundooyinka looga baahan yahay. Heerarkaasu waa kuwa aan ardeyda ka fileyno inay gaadhaan ama ay heer kasta oo fasalka ay ku jiraan waxyaabaha laga rabo sameyn karaan . Dugsiyada Middoobey ee Degmada San Diego waxay u heelan yihiin inay dhammaan carruurta siiyaan taageerada waxbarasho ee ay u baahan yihiin, si heerka fasalka ay ku jiraan guul uga gaadhaan, isla mar ahaantaasna, u gaadhaan shuruudaha looga baahan yahay inay dugsiga sare ka qalin jebiyaan.

Heshiis Waxbarasho ayaa lala galay ardey kasta oo looga baqayo inay dhibaato ka qabsato inuu heerkii looga baahnaa ka gaadhi waayo xaga wax akhriska iyo/ama xisaabta ee ku salleysan qiimeynta degmada iyo dawlad-goboleedka. Heshiiskaas Waxbarasho wuxuu ku talineyaa inay macallimiinta iyo dugsiguba taageero iyo dhexgelis ku sameeyaan waxbarashadda ardeyda taas oo ardeyga u sababi doonta inuu guuleysato, una gudubo heerka fasalka ku xiga. Ardeygii gaadhi waaya heerka buundooyinka looga baahan yahay waxaa lagu celin doonaa heerka fasalka ee uu hada ku jiro. Waxaa intaas weheliya, ardeygii ku gudbi waaya Imtixaanka looga Qalin jebineyo Dugsiga Sare ee Kaaliforniya, lagama guddoonsiin doona shahaado dugsiyada sare ee guud ee Kaaliforniya.

Waxqabadka waalidku wuxuu kaalin weyn ka ciyaaraa inay carruurtu waxbarashadda dugsiga ku guuleystaan. Si uu ilmuhu waxbarashadiisa u horumariyo, waxaa lagama maarmaan ah inay dugsiyada iyo waalidiintuba si wadajir ah u wada shaqeeyaan, isla mar ahaantaasna, taageero iyo dhiirigelin carruurta u siiyaan. Heshiiska Waxbarashadda waxaa loogu talagalay inuu ardeyda, qoysaska iyo dugsiyada ka dhigo hal jaal oo ka wada shaqeyneya inay ilmuhu waxbarashadda heer sare ka gaadhaan. Haddii aad rabtid inaad wax ka ogaatid sida aad ilmahaaga ku caawin lahayd inuu ilmahaagu ku guuleysto waxbarashadda dugsiga, fadlan waxaad la xidhiidhaa dugsiga uu ilmahaagu dhigto. Waxaan kaloo kugula talineynaa inaad eegtid shabakada internetka degmada ee Hawlgalka iyo Taageerada Waalidka oo ah http://www.sandi.net/indices/parents.htm

Heshiiska Waxbarashadda waxaa ka mid ah natiijooyinka ilmahaaga ee uu macallinku u adeegsadey inuu ku qiimeeyo heerka waxbarashadiisa iyo weliba taageerada iyo dhexgelista waxbarashadiisa lagu sameyn doono sannadkan. Barnaamijka Data Director ee Taarikhda Waxbarashadda ee Ardeyga iyo Heshiiska Waxbarasho waxay sameeyaan macluumaad badan oo ardeyga lagu qiimeynayo waxaa lagu sharaxay jaantuska hoose ku qoran.

SHARAXAADA DHIBCAHA

Qiimeynta	**Waa maxay macnaha dhibcuhu…**
Imtixaanka Akhriska Gates-MacGinitie Reading Test (GMRT)	Waxay tusineyaa heerka fasal ee ardeygu uu si madax-bannaan wax u akhriyi karo wakhtiga imtixaanka.
Imtixaanka Heerarka ee CA (CST): Farshaxanada Af Ingiriisiga, Xisaabta	Waxay tusineysaa Miisaanka Dhibcaha iyo heerarka laga marayo Farshaxanada Af Ingiriisiga (ELA) iyo Xisaabta iyo weliba qeyb kasta ee ELA iyo Xisaabta sida uu ardeygu ku ahaa.
Imtixaanka looga Qalinjebineyo Dugsiyada sare ee CA (CAHSEE): Wax akhris iyo wax qorista, Xisaabta	Waxay tusineysaa inuu ardeygu ku gudbay (P), ama ku dhacay (NP) qeyb kasta oo imtixaanka CAHSEE ah.
Layliska Imtixaanka looga Qalinjebineyo Dugsiyada sare ee CA (PCAHSEE): Wax akhris iyo wax qorista, Xisaabta	Waxay tusineysaa sida uu ardeygu ku ahaa imtixaanka PCAHSEE ee Fasalka 9aad, kaas oo warbixin inaga siineysa meelaha uu ku wanaagsan yahay iyo meelaha uu ku liito.
Imtixaanka Horumarinta af Ingiriisiga ee CA (CELDT, kuwa af Ingiriisiga baraneya)	Waxay tusineysaa Guud ahaan heerka Af Ingiriisiga uu Ardeygu ka marayey (OPL) markii imtixaanka laga qaaday (Bilow, Bilow Dhexe, Dhexe, Bilow Sare, ama Sare).
Guud ahaan Heerka Af Ingiriisiga ee Ardeyga laga Rajeynayo (eOPL)	Waxay tusineysaa Guud ahaan Af Ingiriisiga uu Ardeygu ka marayo la rajeynayo, taas oo ku xidhan wakhtiga uu dugsiga ka diiwaan gashanaa.
Cabbirka Qiimeynta Waxbarashadda Degmada: Wax akhris iyo wax qorista, Xisaabta	Waxay tusineysaa sida uu ardeygu ku ahaa qiimeyntii dhammaadka-cutub-kasta ee Wax akhriska iyo wax qorista iyo Xisaabta.
Dhibcaha	Wuxuu tusineyaa inuu ardeygu ku taagan yahay “tubtii” uu ku qelin jebin lahaa wakhtigii loogu tala galay